



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

## Xusuusin: Maaskarada Waa in La Xirnaandaa Inta Waxbarashada Iskudhafan Fasalada Lagu Qaadanayo

Maarso 31, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Bilowgii waxbarashada iskudhafan wuu socdaa. Waxaan jecelnahay inaan xusuusino dhammaan shaqaalaha iyo ardayda in looga baahan yahay inay xirtaan maaskarada inta ay ku jiraan fasalada ay waxbarashada iskudhafan ku qaadanayaan. Tani waxa ay inaga caawin doontaa inaan dhammaanteen ilaalino badqabkeena iyada oo jawiga ardayda iskuulkuna ahaado mid caafimaad leh iyo in looga baahan yahay qof kasta oo waxbarashada iskudhafan qaadanaya.

Tallooyinka ku socda ardayda:

- Maaskaradu waa inay qarisaasankaaga iyo afkaaga labadaba.
- Maaskaradu waa inay ahaataa mid labo lakab ah.
- Maaskaro ma haysto? Dhibaato ma jirto! Waa in macallinkaagu ogaadaa in aanad haysan maaskaro(hore uga sheeg si uu u ogaado ) intaas ka dib anaka ayaa mid ku siin doona. Waxaan sidoo kale laga heli karaa irida laga soo galo haddii ay dhacdo inaad soo ilowday maaskaradaadii.
- Haddii ay dhibaato kaa haysato maaskaradaada, waa inaad la socodsiiisaa macallinkaaga.
- Waa in aad xirnaataa maaskaradaada ilaa uu macallinkaaga kaaga sheegayo WAA ISKA CAADI (OK) inaad iska bixiso maaskarada.
- Fadlan maaskaradaada cidna ha la wadaagi.

Qoysaska: Haddii ardaygiinu aanu xiran karin maaskarada sababo caafimaad dartood ama naafanimu, fadlan si toosa ah ula xiriir macallinka ardaygaaga.

### Xirashada Maaskarada – Agabyada La Heli Karaayo

Waxaan idiin diyaarinay dhowr arrimood oo kaa caawinaya ardaygaaga iyo qoyskaaga waqtiga kal-guurka ee waxbarashada iskudhafan la qaadanayo:

- [Buqshada Dib u furista](#)
- Fiidiyow: [Sida Loogu Xirto Maaskarada Iskuulka](#)
- Sheekada Bulshada: [Waan Xiran Karaa Maaskaradayda Sheekada Bulshada Si Nabadgelyo Leh](#)

- Xaashiyaha Xogta Xambaarsan: [Tallooyinka Xirashada Maaskarada PK-12 \(xaashiyaha xogta xambaarsan\)](#)